Soomaali

Metro South Health waa bixiyaha ugu weyn adeegyada caafimaadka dadweynaha ee koofurta Barisbane, iyo gobolada Logan, Redlands iyo Scenic Rim. Waxaan leenahay shan isbitaal iyo dhowr cafimaadka bulshada ah, caafimaadka dhimirka iyo adeegyada caafimaadka ilkaha.

Markii degdeg jiro

Waa inaad mar walba wacdaa Saddex Eber (000) wixii degdeg ah oo nolosha halis gelinaya. Wixii taloooyin caafimaad ah oo aan-degdeg ahayn, waxaad wici kartaa khadka taleefankayaga caawimaadda caafimaadka oo loo yaqaan 13 HEALTH ama 13 43 25 84.

Waxaan haysanaa shan qaybaha degdegga kuwaas oo furan 24ka saac maalintii, toddobada maalmood ee asbuuciiba.

- Isbitaalka Beaudesert l
- Isbitaalka Logan
- Isbitaalka Princess Alexandra
- Isbitaalka QEII Jubilee
- Isbitaalka Redland.

Looma baahna inaad marka kowaad soo wacdo, keliya imow qaybta waqti kasta. Markii aad timaaddo qaybta degdegga, fadlan toos u tag miiska qaabilaadda. Waxaaa ku **qiimayn** (qaybayn doonaa) doona kalkaalisooyin tababaran kuwaas oo qiimeeya degdegnimada xaaladdaada. Waxaa muhiim ah inaad kakaalisada u sheegto wixii dhibaatooyin caafimaadkaagii hore, daawooyinkaaga hadda socda, iyo haddaad waddanka dibaddiisa tagtay iyo in kale.

Dhaqtar ama kalkaaliso ayaa ku arki doona sida ugu dhaqsaha badan intii ay karaanba. Mar kastana, way kaa tegi karaan si ay u daaweeyaan xaaladaha halis-gelinaya nolosha. Kama tegi doonaan daryeelkaaga, in kastoo macnaheedu noqon karo inaad muddo dheer na sugto.

Ikhtiyaarada xaaladaha aan-degdegga ahayn waxaa ka mid ah:

- Wixii xaalado caafimaad oo aan-degdeg ahayn waa inaad aragtaa dhaqtarkaaga degaanka – kuwaas oo qaarkood sameeyaan inay biil soo diraan.
- Ama soo wac taleefanka caawimaada caafimaadka 13 HEALTH (13 43 25 84) wixii la-talin caafimaad ah oo aan degdeg ahayn oo ka socda kalkaaliyeyaasha tababaran.

Adeegyada la heli karo

Waxaan bixinaa adeegyada isbitaalka takhasusleyaasha oo ay ka midka yihiin:

- adeegyada kansarka
- baarista wadnaha
- daawooyinka degdeg ah
- caafimaadka dhimirka
- obstetrics-ka iyo daaweynta haweenka
- dhaqan-celin
- jirdilka
- Xubno ku-tallaalista

Waxaan kaloo bixinaa adeegyo badan oo aan siino bulshada oo ay ka midka yihiin:

- adeegyada u-barashada (daroogada iyo khamriga)
- baarista kansarka naasaha
- Maaraynta cudurada karoonikada ah
- dhaqan-celinta bulshada
- caafimaadka dhimirka
- caafimaadka afka
- caafimaadka qaxootiga
- Daryeelka palliative-ka

Ka hel lambarka taleefanka iyo cinwaanka ee isbitaalkaaga iyo xaruuntaada caafimaad ee kuugu dhow bogga xirriiradeena.

Xaq-u-yeelashada iyo meel-u-diridda

Adeegyada isbitaalka

Badiba adeegyadeena waxaa loo bixiyaa ayagoo lacag la'aan ah u ah dadka haysta kaarka Medicare-ka. Hase ahaatee, waxaad badanaa u baahan doontaa meel-u-dirid qoraal ah oo ka socota dhaqtarkaaga/GP-gaaga guud ka hor intaanan ballan kuu samayn.

Si aad u heshp meel-u-dirid, marka hore kala hadal dhaqtarkaaga/GP-gaaga guud wax ku saabsan dareenada daryeelka caafimaadkaaga.

Dhaqtarkaaga ayaa go'aamin doona haddii aad u baahan tahay daaweyn kuuna qori doona daawooyin ama baarisyada aad u baahan tahay. Dhaqtarkaaga ayaa markaas ka dib u diri doona warqad meel-u-dirid qoraal ah dhaqtar takhasuslaha ah oo jooga mid ka mid ah isbitaaladeena.

Ayadoo ku xiran xaaladdaada degdeg, waxaa lagugu dari karaa liiska sugitaanka ka hor intaanan kuu qoondayn ballan. Waxaan kuu soo diraynaa warqad si aan u xaqiijino watiga iyo taariikhda ballantaada.

Adeegyada aan u baahnayn meel-u-diridda GP-ga

Uma baahnid meel-u-diridda dhaqtarka/GP si aad u hesho:

- daaweynta qaybta degdegga ah
- daryeelka caafimaadka dhimirka oo degdegga ah
- Kilinikada caafimaadka galmada.

Adeegyada daaweynta ilkaha

Uma baahnid meel-u-diridda dhaqtarkaaga/GP-gaaga si aad u hesho daaweynta ilkaha, hase ahaatee waa inaad yeelataa shuruudaheena xaq-u-yeelashada:

- dadka waaweyn kuwaas oo haysta kaarka Howlgabka, kan Daryeelka-caafimaad ama kan Saniyaaradii hore.
- carruurta:
    - dhammaan da'doodu u dhaxayso 4 ilaa sannadka 10aad
    - ardayda sannadka 11aad iyo 12aad kuwaas oo haysta kaarka socda ee Howlgabka, kan Daryeelka-caafimaad ee Centrelink.
    - 0-3 sano jirada kuwaas oo waalidkood haystaan kaarka socda ee Howlgabka, kan Daryeelka-
      caafimaad ee Centrelink.
      2-7 sano jirada kuwaa oo xaq-u-leh Mashruuca Manaafacaadka Daaweynta Ilkaha Ilmaha

Imaanshaha isbitaalka

Bukaan-socodka dibadda

Markii aad u timaado isbitaalka daaweyn maalmeed, waxaa laguu yaqaan "bukaan-socod dibadeed". Maaddaama aad tahay bukaan-socod dibadeed waxaad badanaa arki doontaa dhaqtar takhasusle ah iyo dhowr kale oo xirfad-yaqaano caafimaad ah. Waxaad kaloo qaadan kartaa raajo ama baarisyo kale.

Markii aad u timaado isbitaalka adoo wata ballanta bukaan-socod dibadeed, waxaad u baahan doontaa:

- warqaddaadii ballanta
- Kaarka Medicare-ka
- Kaararka concession-ka sida Kaarka Daryeelka Caafimaadka ama Kaarka Arimaha Veteraanska
- natiijooyinkii baarista
- raajooyinka
- liiska wixii daawooyin ah oo aad si joogto ah u qaadato
- wax aad isku maaweeliso intaad sugayso sida buugga, joornaalka, tolidda daabaca, iwm.

Waxaan ku talinaynaa inaad timaado kilinikada bukaan-socdka dibadeed ugu yaraan 15 daqiiqo ka hor waqtiga ballantaada, iyo inaad u qoondayso ugu yaraan laba saacadood ballantaada. Haddii aadan kari karin inaad timaado ballantaada sabab kastoo jirta, fadlan la xiriir sida ugu dhaqsaha badan adigoo adeegsanaya lambarka taleefanka ku dul qoran wejiga hore ee warqadda ballantaada.

Bukaan-socodka gudaha

Markaad habeenkii jiifsanayso isbitaalka si laguu qalo ama daaweyn caafimaad oo degdeg ah, waxaa laguu yaqaan “bukaan-socod gudeed”.

Haddii aad habeen kaas jiifsanayso, waa inaad soo qaadataa:

- Kaarka Medicare-ka
- Kaararka concession-ka sida Kaarka Daryeelka Caafimaadka ama Kaarka Arimaha Veteraanska
- natiijooyinkii baarista
- raajooyinka
- liiska wixii daawooyin ah oo aad si joogto ah u qaadato
- dharka habeenkii lagu seexdo ama canbuurka la xidho
- dacaska habboon
- waxyaalaha musqusha loo adeegsado – cadayga, daawada cadayga, buraashka timaha, shanlooyinka, saabuunta waxyaalaha dumarka
- giirka garka lagu xiirto oo shaqsiga ah
- fasaleetiga ama tiishuu
- boorso aad u weyn oo ku filan inay qaado waxyaalahaaga oo dhan

Waxyaalaha muhiimka ah oo ay tahay inaad ogaato markaad jiifto isbitaalka:

- **Aqqoonsiga**—Intaad jiifto isbitaalka waxaa lagu weydiin doonaa marar badan wax ku saabsan faahfaahinta aqoonsigaaga. Tan waa qayb ka mid ah oo lagu hubinayo inaan ku siinayno daawooyinkii iyo daaweyntii saxda ahayd.
- **Cuntooyinka**—Cuntooyin ayaan siinaa bukaan-socodka saddex jeer maalintii, iyo shaah subaxdii, shaah galabtii iyo cashada. Waxaan ku siin karnaa cunto xalaal ah iyo cuntooyinka kale oo gaarka ah halkaas oo ay qayb ka yihiin baahiyaha daryeelkaaga caafimaad ama dhaqaneed ama diineed.
- **Daawooyinka**—Waxaa lagu siin karaa daawooyin aad qaadato inta lagu jiro iyo ka dib jiifkaaga isbitaalka. Fadlan weydii shaqaalaha wixii su'aalo ah oo aad ka qabto waxay yihiin daawooyinkaas iyo inta ay tahay inaad qaadato. Waxaa kaloo muhiim ah inaad dhaqtarkaaga ama shaqaalaha kalkaaliyahaaga u sheegto haddii aad qabto wax aleerjiko ah.
- **Hantida shaqsiyeed**—Fadlan ha soo qaadan wax lacag badan ah iyo waxyaalaha kale oo qiimaha weyn leh sida taleefanada moobaylka, kombiyuutarada laab-toobka ah, tablidyada elagtarooniga ah, dahabka ama waxyaalaha qiimaha shucuureed leh.
- **Isbitaalka ka-bixidda**—Waxaad u baahan doontaa inaad diyaarsato qof qaraabo ama saaxiib ah inuu ku geeyo guriga. Fadlan la soco in qarashka gaadiidka uu yahay masuuliyadaada.

Ma u baahan tahay turjumaan?

U sheeg shaqaalaheena luqaddaada. Waxaan kuu diyaarinaynaa turjumaan lacag la'aan ah.Fadlan shaqaalaha jooga kilinikadaada ama woodhkaaga ha ogaadaan sida ugu dhaqsaha badan haddii aad doonayso turjumaan
si aan hore ugu diyaarino.

Waa qorshaheena inaan adeegsano turjumaano xirfad-yaqaano ah si buuxdana ugu tababaran dhammaan wada-hadallada caafimaad. Qoysas ama saaxiibo badanaa si sax ah uma turjumaan macluumaadka caafimaad oo kakan.

Falcelis ka bixin adeegyada caafimaadka

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad noo sheegto wax ku saabsan waayo-aragnimadaada isbitaalka Metro South Health ama adeegga.Si aanu wax ka ogaano wax kasta oo dareen ah oo aad qabto,Fikrado naga sii si aan u hagaajino, ama mahadnaq uga samayno.

Logan Hospital and Beaudesert Hospital	(07) 3299 8587 CLS_LB@health.qld.gov.au
Princess Alexandra Hospital	(07) 3176 5598 PAH_PLO@health.qld.gov.au
QEII Jubilee Hospital	(07) 3182 6110 CLO_QE2@health.qld.gov.au
Redland Hospital and Wynnum Health Service	(07) 3488 3504 Consumer_Liaison_Bayside@health.qld.gov.au
Addiction and Mental Health Services	(07) 3339 4629 ED_mhsmetrosouth@health.qld.gov.au

Waxaad kaloo haysataa ikhtiyaarka la xirriiridda Xafiiska Caafimaadka . Ombudsmaanku waa ka madaxbanaan yahay Metro South Health waxaana lagala xiriiri karaa:

- Cinwaanka Website: www.oho.qld.gov.au
- Talaeefanka: 133 OHO (133 646)
- Email: info@oho.qld.gov.au
- Post: PO Box 13281 George St, Brisbane QLD 4003.